

**Xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare Kacaanka,**

**28 Setembar 1971, lamba. 240.**

**Isbaddalka qod. 6 e Xeer Nidaamiyaha Xisaabaadka Dawladda.**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA SARE KACAANKA**

Marka uu arkay oggolaashaha Golaha Sare Kacaanka;

**WUXUU MEELMARIYAY**

Xeerka soo socda:

**Qod. 1**

**Wax ka Baddallada**

1. Xukuumadda waxaa loo wakiishay in ay wax ka baddasho Miisaaniyadda Horumarka ee ku saabsan wareejinta lacag mashruuc, loona wareejinayo mid kale, marka laga reebo, sida ku qoran faqradda soo socota;
2. Wasiirka Maaliyadda waxaa loo wakiishay in uu wax ka baddalo Miisaaniyadda Horumarinta ee la xariirta wareejinta lacagta madax-xigeen loo wareejinayo mid kale oo ah isla mashruuca iyo mashruuc kale, iyadoo ku kooban Mashruuca ay Wasaaraddu iqtisaaska u leedahay.

**Qod. 2**

**Dhaqangalka**

Xeerkaan de-deg ayuu dhaqangalayaa.

Muqdisho, 28 Setembar 1971.

Guddoomiyaha  
Golaha Sare Kacaanka  
**S. Gaas Maxamed Siyaad Barre**